

## Tababar Musqul

### 1. Calaamadaha rabitaan Musqul:

Cunugaaga:

- Wuxuu ka toosay hurdo gaaban isaga oo qalalan
- Ha ku joogo qalaayl ugu yaraan laba saac
- Waa uu tilmaami/tusi karaa raaxo – la'aanta ay leedahay xafaayada qoyan/wasaqaysan
- Waa ka helay musqusha biyo raacinteeda iyo ku fariisadkeeda
- Waa ku raaxeestaa iska yeel-yeelid walaalkii/walaashii ka weyn ama asaaggii
- Waa dareensanyahay in xafaayadu qoyan tahay/wasakhaysan tahay

### 2. Tababarka hore ee musqusha:

Horumarinta nidaamka cunugaaga:

- Xafaayada ugu bedel musqusha
- U ogolow cunugaaga in uu arko walaalkii ama waalidkii oo isticmaalaya musqusha
- Ku banee xafaayada wasakhda ah musqusha gudaheeda una ogolow canugaaga inuu biyo raaciyo
- Isticmaal ereyo iyo sawiro mujinaya wax qabadka (Tusaale: musqul, tuunji, kaadi iyo saxaro iyo w.m.a.)
- Canuga tababar ayuu ku qaadan karaa in uu musqusha ku fariisto isaga oo dharkiisa xidhan
- U akhri canugaaga buugaagta ka hadlaysa sida musqulaha loo isticmaalo sida “Once Upon a Potty” by Alona Frankel
- Taabsii cunugaaga xafaayada una sheeg in ay qoyan tahay ama qalalan tahay
- Ha kaa caawiyo soo qaadida xafaayada cusub, hana ku tuuro qashinka ta wasaqda ah
- Ciyaar iska yeel ah u samee cunugaaga si aad ugu horumariso dareenkiisa, Tusaale: “Fisher Price oo dad yar-yar ah” u isticmaal musqusha oo yar ama tuunji alaabta ilmaha ku ciyaaraan ah
- Ku dadaal in aad ka fogaato wixii ficil xuma ah xaga saxarada, tusaale; intii aad odhan lahayd “Uf, way qurmaysaa” dheh “Alla saxaraan urinayaa”

### 3. Ra’yiyaal kale:

- Gee cunugaaga musqusha waqtiga aay inta badan xafaayada qoyan tahay
- U ogolow cunuga in uu sah’miyo musqusha ka hor intuusan sticmaalin
- U diyaari cunuga tegista musqusha adigoo si joogta ah u isticmaalaya sawiro una magacaabaya sheey’ada
- Ka dhig musqusha mid lagu raaxeysto, tusaale; musik, alaabta lagu ciyaaro, ama boogaag
- Ka siib xafaayada waqti gaaban isticmaalna kastuumo
- Rajo iyo deganaansho lohow, ammaanna dadaalka ugu yar ee ubadku muujiyo xaga isticmaalka musqusha

Fiira gaar ah: Haddii cunugaaga uu baqayo ama cadhoodo waqtiga musqusha, jooji tababarka musqul isticmaalka. Waxaa suura gal ah in uusan diyaar ahayn. Ku noqo qaar ka mid ah waybta hore a tababarka musqusha, marka cunugaaga uu u ekaado inuu diyaar u yahay.  
(Waxaa laga soo xogtay qolooyin fara badan)